


# NE 130th St & NE 125th St Mobility and Safety Project (Mashruuca Socodka iyo Nabadgelyada)

Sebteembar  
2023



## Hagaajinta isku xirka tareenka fudud iyo xaafadda!

Sannadka 2026, Sound Transit waxa ay furaysaa isteeshanka tareenka fudud ee NE 130th St ee u dhaw I-5 waxaana ay filaysaa 3,300-3,700 rakaab ah maalin kasta - iyada oo 90% rakaabku ay ku imaanayaan lugta, baaskiil, ama gaadiid dadweyne. Horumarinteen qorshaysan waxay ka dhigi doontaa mid badbaado leh oo sahlan in la tago saldhigga tareenka fudud ee cusub ee dadka lugeynaya, baaskiilka, wax-wareega, iyo raacitaanka baska. Kooxdayadu waxay naqshadeyneysaa hormarinmno garab socda NE 130th St, Roosevelt Way NE, iyo NE 125th St inta u dhaxaysa 1st Ave NE iyo Lake City Way NE.

Horumarinta mashruuca waxaa ka mid ah:

- Laymanka baaskiilka ee la ilaaliyo dhammaan aagga mashruuca
- Horumarinta gaadiidka sida joogsiyada cusub ama la cusboonaysiiyay ee baska iyo sifooyinka baska mudnaanta leh si loo hagaajiyo soo noqnoqoshada iyo isku halaynta
- Naqshadaha wadooyinka iyo isgoysyada la cusbooneysiisay si loo yareeyo shilalka dhimashada iyo kuwa halista ah
- Horumarka isgoysyada sida hormarinta waqtiyada dadka lugeynaya in la siiyo dadka soconaya bilaabid hore
- Dayactirka dariiqyada lugta iyo dalcadaha cusub ee laga geli karo meelaha la doortay

**Iskaan-garee koodhka QR ee hoose si aad u booqato bog-khadka oo aad u buuxiso foomka jawaab celinta. Jawaabahaagu waxay naga caawin doonaan inaan si wanaagsan u fahanno baahiyaha bulshada hadda iyo mustaqbalka.**

### Waxaan rabnaa inaan ogaano:

- Sida aad ugu dhex-safarto xaafadda
- Sida safarkaagu isu bedeli karo marka la furo xarunta tareenka fudud ee NE 130th St
- Maxaad u malaynaysaa soo jeedintayada naqshadaynta hore



### Xiriirka Mashruuca:

Drue Nyenhuis

NE130thSt\_NE125thSt\_Project@seattle.gov

(206) 400-7515

[www.seattle.gov/transportation/NE130thMobilityProject](http://www.seattle.gov/transportation/NE130thMobilityProject)




Seattle  
Department of  
Transportation



King County  
**METRO**

# Jadwalka



*we are here*

- **Qorshaynta (Dhamaystiran):** Waxaan la hadalnay xubnaha bulshada iyo milkiilayaasha ganacsiga si aan u dhiso qorshayaashii hore iyo ka-qaybgalka bulshada ee laga hirgaliyey aagga. Shaqadayada waxa ka mid ahaa in aan si siman u qaabaynno horumarka badbaadada iyo helitaanka iyo maalgelinta la heli karo.
- **Nakhshad (2023-2025):** Waxaanu abuuri doonaa oo aanu wadaagi doonaa soo jeedinta naqshadaynta mashruuca, waydiin doonaa jawaab celinta bulshada, waxaanu dhamaystiri doonaa naqshadaynta mashruuca.
- **Dhismaha (2025-2026\*):** Waxaan wadaagi doonaa macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan jadwalka dhismaha, hawlaha, iyo saamaynta xaafadaha markaan gaarno heerkan.
- **Adeegga tareenka fudud wuxuu bilaabmayaa (2026):** Sound Transit wuxuu qorsheynayaa inuu furo NE 130th St Infill Station oo uu bilaabo adeegga 2026. Fadlan booqo shabakada Sound Transit si aad u hesho jadwalka hadda iyo macluumaadka mashruuca.

\*Jadwalka dhisidda wuxuu isku-beddeli karaa helitaanka ku salaysan shaqaalaha iyo helitaanka alaabta.

## Xiriirka Mashruuca:

Drue Nyenhuis

NE130thSt\_NE125thSt\_Project@seattle.gov

(206) 400-7515

[www.seattle.gov/transportation/NE130thMobilityProject](http://www.seattle.gov/transportation/NE130thMobilityProject)

